# Waa maxay ilaha xiriirka bulshada?

## Daraasad tijaabo ah oo ka dhacday Banaadir, Soomaaliya

SoCap Xogta Kooban ee Cilmi Baarista
Lambar 3, Ogosto 2026

## Qodobbada muhiimka ah

**Qiyaastii saddex-meelood laba meel dadka gudaha ku barakacay ee la waraystay ayaa sheegay in aanay jirin wax caawinaad ah oo ay heleen ka dib markii ay la kulmeen shoog ama dhibatooyin. Kuwa sheegay inay heleen taageero, deriska ayaa ahaa isha ugu badan oo taagerada u muujiyay**. Deriska – sida ay muujinayaan xogaha tayada leh, inay ugu horrayn yihiin dadka barokacayaasha ah – ayaa si gaar ah muhiim u ahaa marka ay la tacaalayaan shoog gaaban oo deg deg ah sida cunto yari, jiro, iyo baahiyaha daryeelka carruurta. Iyadoo qoyska iyo qabiilku ay muhiim yihiin, qaar badan oo ka mid ah jawaab-bixiyeyaashu waxay sharxeen in qaraabadu ay degan yihiin meel fog ama ay naftooda la halgamayaan nolosha. Natiijo ahaan, deriska ayaa inta badan loo aqoonsaday inay yihiin dadka ficil ahaan caawin kara dadka dhibaataysan ee barakacaaysha ah. Tani waxay muujinaysaa sida ay derisyadu muhiim u yihiin, iyo sida ay u xaddidan tahay taageerada.

**Barakacayaasha gudaha dalka ee gobolka Banaadir waxay si aan sinnayn uga qayb qaataan kooxaha abaabulan, waxayna sheegaan in codkooda iyo saameyntooda go'aan-qaadashada ay xaddidan tahay.** Ka qaybgalka kooxaha sida iskaashatooyinka, ururrada horumarinta nolol-maalmeedka, ama ururrada haweenka ayaa ahaa mid hooseeya, iyadoo saddex meelood meel afar ah ee jawaab-bixiyeyaasha ay sheegeen inaanay ku lug lahayn kooxaha noocaas ah. Xitaa kuwa firfircoon ee ka qayb qaata kooxahaas, oo ah tiro aad u yar ayaa sheegay inay kalsooni ku qabin in codkoodu saameyn ku leeyahay goobahaas. Warbixinnada tayada leh ee haweenka ayaa muujinaya caqabad dheeraad ah oo ay la kulmaan: xitaa marka haweenku si qoto dheer uga qayb qaataan hawlaha bulshada, codkooda inta badan waa la iska indhatiraa ama lama tixgeliyo.

**Daboolista xiriirka bulshada ee isku xira barakacayaasha gudaha dalka iyo bulshooyinka martida loo yahay ee Banaadir ayaa weli ah mid daciif ah, ku kooban danaha isdhaafsiga, isla markaana aan si wanaagsan loo nidaamin ama loo hay'adeeyn. Hoggaamiyeyaasha diinta iyo odayaasha dhaqanka ayaa bixiya taageero dhexdhexaadin ah oo aan si siman u gaadhin dhammaan dadka**. Meelo badan oo gobolka Banaadir ka mid ah, barakacayaasha iyo bulshada martida loo yahay waxay ku nool yihiin meel isu dhow. Si kastaba ha ahaatee, xogaha tayada leh ee laga helay ka qaybgalayaasha cilmi-baarista ayaa muujiyay in isu-dhowaanshaha deegaanku aanu si toos ah u dhalin xiriirro bulsho oo xooggan. Xiriirka u dhexeeya barakacayaasha iyo bulshada martida loo yahay ayaa inta badan lagu tilmaamay mid ku salaysan baahi iyo dan isdhaafsi, sida xubnaha bulshada martida loo yahay oo shaqooyin ku-meel-gaar ah siiya barakacayaasha, halkii uu ahaan lahaa xiriir bulsho oo qoto dheer. Xiriirradaasi badanaa waxay ku koobnaadaan shaqo ama wada-noolaansho, halkii ay ku dhismi lahaayeen kalsooni, go'aan-qaadasho wadajir ah, ama dareen ku saabsan mustaqbal la wadaago.

**Joogitaanka muddada dheer ee dadka gudaha ku barokacay ee gobolka Banaadir si toos ah uguma horseedo inay yeeshaan shabakado bulsho oo ballaaran ama xiriirka bulshada oo xooggan. Taa beddelkeeda, xiriirrada ugu muuqda uguna firfircoon ayaa inta badan ku kooban deriska iyo dadka ku nool deegaanka dhow.** Barakacayaal badan oo ku nool Banaadir ayaa sanado badan deggenaa isla goobta. Si kastaba ha ahaatee, xogaha tayada iyo tiradu waxay muujinayaan in waqtigu kaligiis aanu keenin shabakado bulsho (daboolista xiriirka bulshada) oo ballaaran ama helitaan wanaagsan oo hay'adaha iyo adeegyada ah (Xiriirka isku xirka bulshada). Xiriirka bulshada ee hiloowga ee isku xirnaanta gudaha ee bulshada barakacayaasha wuxuu u muuqdaa inuu sii xoogaysto heer deegaan ahaan, balse si dhif ah ayuu uga gudbaa xadkaas oo uu ugu fidaa bannaanka bulshadaas. Jawaab-bixiyeyaashu sidoo kale waxay tilmaameen in bulshada martida loo yahay ay leeyihiin shabakado bulsho oo qoto dheer oo si wanaagsan u dhisan, kuwaas oo dadka barakacay ay adag tahay inay helaan ama ku biiraan xitaa marka ay halkaas ku noolaadaan sanado badan. Mid ka mid ah sababaha suurtagalka ah ayaa ah in barakacayaashu ay la tacaalayaan saboolnimo iyo baahiyo badan, taas oo ka hor istaagta inay helaan waqti ay ku dhisaan xiriirradan bulsho ama ay bixiyaan is-dhaafsi iyo taageero loo baahan yahay si loo kobciyo noocan xiriirka bulshada.

# Hordhac iyo Asalka Daraasadda

**Mashruuca Doorka Xiriirka Bulshada ee Magaalooyinka Nugul oo ay Colaadaha Saameeyeen (SoCap) waa mashruuc cilmi-baaris oo soconaya saddex sano, kana helaya maalgelin Irish Aid. Mashruucani wuxuu daraaseynayaa xiriirka ka dhexeeya xiriirka bulsho, adkeysiga, deegaanka magaalooyinka, iyo xaaladaha colaadda iyo nuglaanta ee saameeya bulshooynka la takooro ama nugul ee ku nool magaalooyinka, gaar ahaan dalalka Haiti, Soomaaliya iyo Somaliland.**

Ujeeddada mashruucu waa in la fahmo sida xiriirka bulsho uu uga qayb qaato adkeysiga bulshooyinka magaalooyinka ee nugul, isla markaana loo aqoonsado meelaha muhiimka ah ee hay'adaha fulinta iyo kuwa dejinta siyaasadaha ay wax ka qaban karaan. Soomaaliya gudaheeda, mashruucu wuxuu si gaar ah u baarayaa su'aasha ah: Sidee ayay dadyowga kala duwan ee barakacayaasha gudaha dalka ee ku barakacay gobolka Banaadir uga ugu adkaystaan dhibaatooyinka iyo cadaadisyada iyagoo ka faa'iidaysanaya helitaanka kala duwan ee xiriirka bulsho?

Xiriirka bulshada waxaa loola jeedaa shabakadaha xiriirka, xeerarka bulshada, iyo kalsoonida bulshada ee fududeeya iskaashi iyo wada-shaqeyn[1]. Daraasado badan ayaa muujiyay muhiimadda xiriirka bulsho ee kor u qaadista adkeysiga marxaladaha kala duwan ee masiibooyinka, laga bilaabo diyaar-garowga ilaa soo kabashada[2]. Si kastaba ha ahaatee, fahamka doorka xiriirka bulsho ee deegaannada ay saameeyeen colaadaha iyo nuglaantu waa arrin adag. Cadaadisyada iyo dhibaatooyinka ka jira deegaannadan badanaa waa kuwo muddo dheer socda, soo noqnoqda, isla markaana aad u saameeya bulshada. Waxaa intaa dheer, amni darrada, barakaca, iyo kala qaybsanaanta la xiriirta colaadaha ayaa xoojin kara, beddeli kara ama wiiqi kara xiriirrada iyo shabakadaha bulshada. Sidoo kale, noocyada xiriirka bulsho ee ku kooban koox gaar ah ayaa mararka qaarkood xoojin kara kalsooni darrada, taas oo dhaawici karta adkeysiga muddada dheer.

Fahamka ilaha laga helo xiriirka bulsho iyo doorka ay ciyaari karaan kooxaha kala duwan ee taageeraya dhismaha xiriirrada bulshada ayaa ah tallaabada ugu horreysa ee lagu fahmi karo sida, iyo xaaladaha ay ku habboon tahay, xiriirka bulshada uu u taageero adkeysiga bulshada. Warbixintan cilmi-baariseed waxay soo koobaysaa habka loo maray daraasadda iyo natiijooyinka muhiimka ah ee wejigii tijaabada ahaa ee mashruuca SoCap ee laga fuliyay degmooyinka Dayniile iyo Kaxda ee gobolka Banaadir. Iyadoo lagu salaynayo natiijooyinkan hordhaca ah, warbixintu waxay soo bandhigaysaa talooyin dhowr ah oo ku wajahan daneeyayaasha kala duwan, waxayna ku soo gabagabaynaysaa dulmar ku saabsan tallaabooyinka xiga iyo cilmi-baarista mustaqbalka.

1. Putnam, R. (1995) 'Bowling Alone: America's Declining Social Capital,' *Journal of Democracy*, 6, 65-78, p. 67.
2. Ka eeg doodda ku jirt Rhude, K., et al. (2025) *A Review of Evidence of the Impact of Social Capital on Resilience*, SoCap Research Brief, No. 1.

# Habka Daraasadda

## Wejiga tijaabada ah ee mashruuca SoCap ee Soomaaliya wuxuu adeegsaday hab cilmi-baariseed isku dhafan oo isku daraya xog ururin tayo iyo tiro leh.

Saddex hab oo waaweyn oo xog ururin ah ayaa la isticmaalay: Sahanno taleefan oo inta badan ka koobnaa su'aalo xiran. Dood-kooxeedyo habaysan; Wareysiyo lala yeeshay xog-ogaallo muhiim ah. Intii u dhaxaysay Sebtembar iyo Nofeembar 2025, kooxda cilmi-baaristu waxay qabatay: 5 dood-kooxeed oo ay ka qaybgaleen xubno ka tirsan bulshada barakacayaasha iyo bulshada martida loo yahay; 4 wareysi oo lala yeeshay odayaal dhaqameed, culimo diimeed, iyo wakiillo ka socday ururrada haweenka; 4 wareysi oo lala yeeshay wakiillo ka socda hay'ado aan dowliga ahayn oo ka shaqeeya arrimaha barakaca, adkeysiga bulshada, iyo wada noolaanshaha bulshada ee Soomaaliya iyo Somaliland. Guud ahaan, daraasaddu waxay gaartay 48 qof oo ka qaybgalay wareysiyo ama dood-kooxeedyo, marka lagu daro 157 qof oo ka jawaabay sahannada. Tiradaas, 142 qof waxay ahaayeen barakacayaal gudaha dalka ah, halka 15 qof ay ka tirsanaayeen bulshada aan barakacsanayn ama bulshada martida loo yahay.

Xog ururinta wejiga tijaabada ah waxaa laga sameeyay degmooyinka Dayniile iyo Kaxda ee gobolka Banaadir. Dayniile iyo Kaxda waa laba degmo oo deris ah kuna yaalla waqooyi-galbeed ee Banaadir. Gobolka Banaadir waa gobolka maamul ahaan ay ku jirto magaalada Muqdisho, caasimadda Soomaaliya. Iyadoo lagu qiyaaso in ay ku nool yihiin qiyaastii 2.8 milyan oo qof[3]. Banaadir waa xarunta ugu weyn ee dhaqaalaha dalka, waxaana ku soo qulqula maalgashiyo badan oo la xiriira dhismaha guryaha, isgaarsiinta iyo bangiyada. Si kastaba ha ahaatee, kooxaha hubeysan ee aan dowliga ahayn ayaa weli khatar amni oo weyn ku haya gobolka, iyadoo dhacdooyin amni oo kala duwan laga soo wariyay gobolka.

Inkasta oo ay jiraan caqabado amni, Banaadir wuxuu hoy u noqday qayb weyn oo ka mid ah barakacayaasha gudaha dalka Soomaaliya. Bishii Janaayo 2024, gobolka waxaa ku sugnaa qiyaastii 1 milyan oo barakacayaal ah, taas oo u dhiganta ku dhawaad 31% dhammaan barakacayaasha Soomaaliya. Intooda badan waxay ku urursan yihiin degmooyinka Dayniile iyo Kaxda. Banaadir wuxuu inta badan martigeliyaa barakacayaal ka yimid gobollada: Shabeellaha Hoose, Bay, Bakool, Shabeellaha Dhexe

Gobolku wuxuu hoy u yahay dad ka soo barakacay colaadaha gudaha iyo sidoo kale dadka ay saameeyeen abaartii ba'anayd ee taariikhiga ahayd iyo roobabkii xooganaa ee xigay, kuwaas oo si gaar ah u saameeyay gobollada: Gedo, Mudug, Bay. Sida lagu sheegay daraasad sahamin ah oo ay sameysay Dowladda Federaalka Soomaaliya, sababaha ugu waaweyn ee dadka barakacay ugu soo hayaamaan Banaadir waxaa ka mid ah: Helitaanka fursado nololeed iyo shaqo (44% jawaab-bixiyeyaasha Dayniile); Helitaanka adeegyada aasaasiga ah sida caafimaadka, waxbarashada iyo biyaha (39% jawaab-bixiyeyaasha Dayniile). Si kastaba ha ahaatee, barakacayaashu waxay wajahaan xaalado nololeed oo aad uga nugul kuwa bulshada martida loo yahay. Farqigaasi wuxuu si gaar ah uga muuqdaa dhinacyada heerka nololeed iyo helitaanka ilaha nolol-maalmeedka, sida lagu muujiyay daraasadda Dowladda Federaalka Soomaaliya.[4]

3. ACAPS (2023) 'Impact of Drought: Banadir and Bay Regions,' *Somalia Thematic Report*, 27 January.
4. Federal Gov't of Somalia (2024) *MoPIED Durable Solutions Progress (DSP) Survey Key Findings Factsheet for Banadir (Daynile and Kahda)*, pp. 1, 17.

# Natiijooyinka Muhiimka ah

## Marxaladda tijaabada ee mashruucan cilmi-baarista waxay ujeeddadeedu ahayd in la fahmo ilaha xiriirka bulshada ee ka dhex jira dadka barakacayaasha gudaha dalka ee ku nool degmooyinka Dayniile iyo Kaxda.

Warbixintan kooban waxay soo bandhigaysaa natiijooyinkii laga helay marxaladda tijaabada, iyadoo loogu talagalay in lagu sharaxo sida xiriirka bulshada uu hadda uga shaqeeyo xaaladaha dhabta ah, halkii laga samayn lahaa sheegashooyin ku saabsan sababaha iyo saamaynta. Maadaama ay yihiin natiijooyin hordhac ah, waa in loo arkaa kuwo tilmaamaya jihada guud oo sahamin ah, kuwaas oo loogu talagalay inay taageeraan barashada, la qabsiga, iyo qorshaynta tallaabooyinka xiga ee mashruuca cilmi-baarista ee soconaya dhowr sano.


## Natiijada 1: Qiyaastii saddex meelood laba meel oo ka mid ah barakacayaasha gudaha dalka ee la wareystay ayaa sheegay in aysan jirin cid wax taageero ah siisay markii ay dhawaan la kulmeen dhibaato, halka kuwa helay taageerada ay derisku ahaayeen isha ugu badan ee gargaarka.

68% ka mid ah barakacayaasha ku nool degmooyinka Dayniiile iyo Kaxda oo la wareystay ayaa sheegay in aysan jirin cid gabi ahaanba taageero siisay intii lagu jiray dhibaato saamayn leh oo ay la kulmeen 12-kii bilood ee la soo dhaafay (eeg Jaantuska 1). Kuwa helay taageero, waxay sheegeen in deriska ugu dhow ay ahaayeen isha ugu badan ee caawimada (12%). Xogaha tayada leh ayaa muujinaya in erayga deris uu inta badan tixraacayo barakacayaal kale. Tani waxay ka muuqataa hadallo ay ka mid yihiin: **"haddii barakacaha kula deggen uu yahay deriskaaga," ama "anaga barakacayaasha dhexdeenna [...] isha ugu horreysa ee xiriirka bulshada waxay ka timaaddaa deriskayga."**

Derisku waxay ahaayeen il taageero oo ka badan qoyska dhow ama qaraabada fog (4%), ururrada aan dowliga ahayn (4%), ama xubnaha iyo kooxaha kale ee bulshada (2%). Tani waxay muujinaysaa laba arrimood: muhiimadda weyn ee deriska iyo xaddidnaanta taageerada noocan ah. Waxaa kale oo muhiim ah in ku-tiirsanaanta deriska aysan yaraanin marka waqtiga barakacu dheeraado. Jawaab-bixiyayaashu waxay sheegeen qaab ku-tiirsanaan oo si guud u joogto ah dhammaan qaybaha taageerada, iyadoon loo eegin muddada ay barakacsanaayeen.

Nooca taageerada la bixiyo badanaa waa mid aan rasmi ahayn, miisaan yar, isla markaana muddo gaaban ah—loogu talagalay in lagu caawiyo dadka si ay uga gudbaan baahiyo degdeg ah ama uga soo kabtaan dhibaatooyin yar yar oo lama filaan ah, halkii ay ka noqon lahayd taageero isbeddel weyn keenta ama soo kabasho muddo dheer ah. Tusaalooyinka la sheegay waxaa ka mid ahaa wadaagga cuntada, caawinta xilliga jirrada, ilaalinta carruurta, ama qof la raacsiiyo xarun caafimaad. Taageeradan badanaa waxaa loo arkaa waajib akhlaaqeed: qaar ka mid ah jawaab-bixiyeyaasha ayaa sheegay in ay jirto dhaqan aan ogolayn in qof wax cuno iyadoo deriskiisu aanu waxba haysan.

Gaar ahaan haweenku waxay si weyn u xuseen muhiimadda ay leedahay caawinta deriska ee nolol maalmeedka.




**Jaantuska 1: Jawaabaha barakacayaasha gudaha dalka ee ku saabsan cidda bixisay taageero intii lagu jiray ama ka dib dhibaatooyinkii ugu saameynta badnaa ee qoysaskoodu la kulmeen 12-kii bilood ee la soo dhaafay (Banaadir, n=142)**

Haweeney barakac ah oo ka qayb gashay dood kooxeed oo ka dhacday Dayniile ayaa tiri: **"Deriskeyga ayaa i caawiya marka aan la kulmo gaajo daran. Xiriirro badan ma lihi; dadka kaliya ee ii dhow waa deriskeyga."** Si kastaba ha ahaatee, jawaab-bixiyeyaashu waxay carrabka ku adkeeyeen in ay jiraan xadadka caawinta ee ka dhex jiri kara barakacayaasha, maadaama ay dhammaantood la kulmaan duruufo dhaqaale oo adag. Sida uu sheegay nin barakac ah, isaga oo ka hadlayay "waxyaabaha yar yar" ee ay isugu kaalmeeyaan barakacayaashu: **"Wax ka badan taas ma awoodaan inay caawiyaan, sababtoo ah iyaguba wax yar bay haystaan."**

Inkasta oo qoyska iyo qabiilka loo arko ilo muhiim ah, jawaab-bixiyeyaashu waxay sheegeen caqabado ka hortaagan in ay taageero bixiyaan. Qaar waxay ku sababeeyeen fogaanta, sida uu sheegay ka qayb-gale: **"Haddii aan u baahdo taageero, ma weydiin laheen qabiilkayga sababtoo ah waxaan ka soo guuray meesha ay qabiilkaygu degan yahay."** (Dood kooxeed, Dayniile). Sharaxaad kale oo la bixiyay ayaa ahayd in qoysasku iyaguna ay dhibaato ku jiraan, sida ay tiri haweeney kale oo ka qayb gashay doodda Dayniile: **"Dadka kaliya ee aan ku tiirsanaan karno waa deriskeenna. Haddii aan rabno in aan ku tiirsanaanno qaraabo, iyaguna waa sabool. Qoyskayga iyo qaraabadaydu waxay ku jiraan xaalad la mid ah. Dhammaanteen waan saboolnay."** (Dood kooxeed, Dayniile).

## Maxaa cusub oo natiijadan ka duwan?

Cilmi-baaris badan oo hore waxay xoogga saartaa muhiimadda ay leeyihiin xiriirrada qoyska iyo qabiilka oo ah ilaha ugu waaweyn ee taageerada dadka barakacayaasha, gaar ahaan meelaha ay colaadaha saameeyeen[5]. Si kastaba ha ahaatee, natiijooyinkayagu waxay keenayaan aragti gaar ah oo dheeraad ah: gudaha magaalada Banadir, jawaab-bixiyeyaal badan ayaa sheegay in aysan helin wax taageero ah gabi ahaanba, halka derisku ay si dhab ah uga noqdeen il taageero oo ka muhiimsan qoyska ama qabiilka marka la eego dhaqanka dhabta ah ee taageerada.

## Maxay tani uga dhigan tahay adkaysiga?

Taageerada deriska ee ka dhex jirta barakacayaasha waxay ka caawisaa qoysaska inay si deg deg ah uga gudbaan dhibaatooyinka muddada gaaban. Si kastaba ha ahaatee, xitaa marka ay jirto, maadaama ay tahay taageero aan rasmi ahayn, miisaan yar, isla markaana badanaa gaaban, ma bixiso difaac ku filan oo ka dhan ah dhibaatooyin soo noqnoqda ama xiisado/caqabadaha muddada dheer.

5. Boateng, A. (2009) 'A Mixed Methods Analysis of Social Capital of Liberian Refugee Women in Ghana,' *Journal of Sociology and Social Welfare*, 36(3), 59–82.; Spaaij, R. (2012) 'Beyond the Playing Field: Experiences of Sport, Social Capital, and Integration among Somalis in Australia', *Ethnic and Racial Studies*, 35(9), 1519–1538; Feinstein, S. and Poleacovschi, C. (2023) 'Making Democracy Work in a Refugee Camp: Social Capital and the Emergence of Empowerment', *Development in Practice*, 33(3), 267–279.

## Natiijada 2: Barakacayaasha gudaha ee Banaadir si siman uguma qayb qaataan kooxaha abaabulan, isla markaana waxay soo sheegaan in codkooda iyo saamayntooda kooban tahay marka ay timaado go'aan-qaadashada.

Xiriirka isku xirka bulshada isku xira barakacayaasha —oo ah xiriirrada ka dhexeeya bulshada iyo hay'adaha ama maamulka dibadda—ayaa ah mid aad u hooseeya. Jawaabaha sahanka waxay muujinayaan in saddex meelood laba meel oo barakacayaasha ah aysan gabi ahaanba ka qaybgelin kooxo abaabulan sida iskaashatooyinka degaanka, kooxaha kaydka ama hab-nololeedka, guddiyada horumarinta deegaanka, ururrada haweenka, ama kooxaha siyaasadda iyo isboortiga. Iyadoo la tixgelinayo in ka-qaybgalka hoose uu saameyn karo kalsoonida xogta, haddana waxaa xusid mudan in wax yar ka badan saddex meelood meel oo keliya oo ka mid ah kuwa ka tirsan kooxaha noocaas ah ay sheegeen inay "wax yar ama si weyn ugu kalsoon yihiin" in fikradahooda lagu tixgeliyo go'aan-qaadashada. Taasi waxay ka dhigan tahay in xitaa marka barokacayaasha ay ku jiraan kooxo abaabulan, laba ka mid saddex qof ay dareemayaan in aysan wax saameyn ah ku lahayn go'aannada[6].

Helitaanka ama la xirrirka madaxda ama dadka saamaynta leh sidoo kale waa mid xaddidan. 66% waxay sheegeen in aysan wax xiriir ah la lahayn dowladda, halka 6% kaliya ay sheegeen xiriir toos ah[7]. Meelaha xiriirku ka jiro, inta badan waa mid aan toos ahayn, oo lagu maro qof kale oo gudbiya cabashooyinka ama codsiyada, taas oo ka dhigaysa in codkooda la dhexdhexaadiyo halkii uu toos u gaari lahaa masuuliyiinta. Xaaladdani, hogaamiyeyaasha diinta iyo odayaasha qabiilka ayaa door muhiim ah leh, inkastoo uu yahay mid aan sinnayn. Waxay isku xiraan barokacayaasha, adeeg bixiyeyaasha, deeqaha samafalka, ama xalinta khilaafaadka. Si kastaba ha ahaatee, helitaankoodu wuxuu si weyn ugu xiran yahay xiriirro shaqsiyeed, taas oo ka dhigaysa in taageeradoodu aysan si siman u wada gaari karin qof walba.

Xiriirka barokacayaasha gudaha iyo hayadaha aan dowliga ahayn, oo matalaya Xiriirka isku xirka bulshada ee hay'adaha gargaarka, badanaa sidoo kale waa mid loo maro dhexdhexaadiyeyaal deegaanka ah. Qaar ka mid ah xog-ogaal ayaa xusay in tani mararka qaar noqoto mid laga faa'iidaysto, iyadoo dhexdhexaadiyeyaashu ay leexsadaan qayb ka mid ah gargaarka loogu talagalay ka-faa'iideystayaasha.

Intaa waxaa dheer, dadka—xitaa barokacayaasha—ee leh xiriirro gaar ah hayadaha aan dowliga ahayn la leh waxay awoodaan inay sii xoojiyaan xiriirkaas si ay u helaan faa'iidooyin badan waqti ka dib. Taas darteed, xiriirrada hayadaha dowliga ah waxay inta badan ku kooban yihiin dad yar, ayna adag tahay in si ballaaran looga faa'iideeyo, taas oo keeni karta natiijooyin nololeed oo aan sinnayn.

Qoraallada tayada leh ee haweenka ayaa muujinaya caqabad kale: xitaa marka haweenku si firfircoon uga qaybqaataan hawlaha bulshada, codkooda inta badan waa la hareer maraa. Qaar waxay sheegeen inay jiraan fursado ay codkooda ku dhiibtaan, balse qaar badan oo haween ah ayaa sheegay in aysan jirin ama ay aad u ya ryihiin fursadaha ay saameyn ku yeelan karaan 'aannada. Haweeney barakac ah oo ka qayb gashay dood kooxeed ayaa tiri: **"Ilaa hadda ma arag meel aan dareemay in codkayga la maqlo ama aan fikraddeyda ku dhiiban karo [...] ma arag meel aan saameyn ku leeyahay oo codkayga la maqlo."**

> **"Ilaa hadda ma arag meel aan dareemay in codkayga la maqlo ama aan fikraddeyda ku dhiiban karo [...] ma arag meel aan saameyn ku leeyahay oo codkayga la maqlo." (Ka qayb gale dood kooxeedka habeysan oo dhedig ah)**

6. Muunad-hoosaadka jawaab-bixiyeyaasha aan ahayn dadka barakacay ee ka firfircoon kooxaha noocaas ah aad bay u hoosaysay taasoo ka hor istaagtay isbarbardhig macno leh oo ku saabsan aragtida codka iyo saameynta.
7. Inkastoo ay ahayd muunad aad u yar, jawaabaha dadka aan barakicin ayaa ahaa kuwo la mid ah, iyadoo aysan jirin farqi dhanka tirakoobka ah oo muhiim ah oo u dhexeeya kooxaha.

Haweeney kale oo ka tirsan koox haween ah ayaa tilmaamtay in ragga ay si xooggan u maamulaan go'aan-qaadashada, taas oo noqota caqabad nidaamsan: **"Caqabadaha aan la kulanno waxaa ka mid ah in raggu ay hogaamiyaan go'aan-qaadashada [...] hay'adaha aan dowliga ahayn waxay inta badan la xiriiraan ragga, halka aan anagu qabanay shaqadii bulshada oo dhan."** Ka qaybgalayaashu sidoo kale waxay si joogto ah u xuseen in dadka saboolka ah, kuwa xanuunsan, ama naafada ah ay yihiin kuwa ugu nugul in la iska indho tiro:**"Ma jiro meel ama qof gudbiya codkooda [...] codkoodu meel fog ma gaaro."**

## Maxaa cusub oo natiijadan ka duwan?

Cilmi-baarista iyo siyaasadaha gargaarka bini'aadantinimo waxay badanaa diiradda saaraan ka-qaybgalka, oo lagu cabbiro in dadka bulshada ay ka soo qayb galaan shirar ama wadatashiyo[8]. Natiijadani waxay ku dartay kala-duwanaansho muhiim ah: in joogitaanka shirarka aysan la mid ahayn saamayn dhab ah. Barokacayaasha waxay sheegayaan in codkooda inta badan uu maro dhexdhexaadiyeyaal, isla markaana aanu si toos ah ugu xirnayn go'aannada saameeya adeegyada, gargaarka, ama ilaalinta.

## Maxay tani uga dhigan tahay adkaysiga?

Haddii aan la helin cod iyo saameyn dhab ah, barokacayaasha way ku adkaataa inay saameeyaan go'aannada noloshooda saameeya. Hadda waxay si weyn ugu tiirsan yihiin dhexdhexaadiyeyaal halkii ay lahaan lahaayeen xiriirro toos ah oo joogto ah oo ka caawin kara is-dhexgal iyo adkaysi waqti dheer ah. Tani waxay sii xoojin kartaa ku-tiirsanaanta, waxayna adkeyn kartaa in laga gudbo heerka la qabsiga loona gudbo "adkaysi dhab ah."

8. Ireland et al. (2025) 'Social Capital and Sexual and Reproductive Health and Rights in Fiji: A Scoping Review of Humanitarian Preparedness and Response Planning and Guidance Documents,' *BMC Health Services Research*, 25(1), 704; Gonzaga, G. L., & Pratama, A. B. (2025) 'Social Capital and Prospects for Collaborative Governance: An Ethnographic Case Study of Sama-Bajaus' Post-Disaster Experiences,' *Public Administration and Development*, epub ahead of print.

## Natiijada 3: Isku xidhka daboolista xiriirka bulshada ee u dhexeeya barokacayaasha iyo bulshada martida loo yahay ee gobolka Banaadir ayaa weli ah mid liidata, oo ku dhisan wax kala iibsi, iyo hay'adayn liidata.

Qeybo badan oo Banaadir ah, barokacayaasha iyo dadka martida loo yahay ayaa ku nool meel aad isugu dhow. Si kastaba ha ahaatee, warbixinada tayada leh ee ka qaybgalayaasha cilmi-baarista ee Kaxda iyo Dayniile waxay muujiyeen in isku-noolaanshaha midba midka kale uusan si toos ah u dhalin xiriir bulsho oo xooggan. Xiriirka ka dhexeeya barokacayaasha iyo martigaliyayaasha ayaa inta badan loo soo bandhigay inay yihiin kuwo wax ku ool ah, shaqaynaya iyo macaamil ganacsi, halkii ay ku salayn lahaayeen xidhiidhada kalsoonida iyo iskaashiga. Isdhexgalka bulshooyinku waxay u janjeeraan inay ku salaysan yihiin shaqada ama wada noolaanshaha, halkii ay ka ahaan lahaayeen waxqabad wadareed, kalsooni, ama go'aan wada jir ah.

Jawaab bixiyaasha martida loo ahaa waxay si joogta ah u sharaxeen xiriirka ay la leeyihiin barokacayaasha xagga shaqada, iyagoo siinaya tusaalayaal "shaqoooyin yar yar, sida qodista godad iyo dhisidda guryaha." Sida ay sheegtay mid ka mid ah haweenka ka qaybgalayaasha dood kooxeed ee ka mid ah bulshada martida loo yahay ee Kaxda ayaa tiri, **"Waxaan xiriir wanaagsan la leenahay dadka soo barakacay. Dadkani way noo shaqeeyaan [...] Way na caawiyaan."** Iyadoo dadka martida loo yahay ay guud ahaan ku tilmaameen xiriirka mid wanaagsan, dhacdooyinka amni darro iyo xatooyada ayaa sidoo kale lagu tilmaamay inay xiriir la leeyihiin dhaqdhaqaaqa dadka barakacay, tiro yar oo ka mid ah jawaab-bixiyeyaashu waxay sheegeen kalsooni darro iyo suurtagalnimada isku dhac u dhexeeya dadka martida loo yahay iyo kuwa soo barakacay.

Barakacayaashu, ayaa iyaguna, ku tilmaamay xidhiidh kala dhaxeeya dadka deegaanka mid ay saameyso baahi dhab ah oo aan ahayn dareen ka mid ahaanshaha deegaanka loo soo barakacay. Mid ka mid ah dadka la waraystay ayaa sharaxay kala go'a u dhexeeya dadka soo barakacay iyo dadka martida loo yahay: **"Waxaan ku nool nahay isku degmo, laakiin kuma noolin isku xaafado."** Mid kale oo isla doodaas ka jawaabay ayaa soo jeediyay nooc ka mid ah ceebaynta bulshada ee la xiriirta barakaca, **“Dadka barakacay iyo kuwa halkan ku noolaa noloshooda oo dhan iskuma dhowa dadka barokacayaasha ah si sahal ah uma dhexgali karaan dadka deegaanka sababtoo ah waxaa loo yaqaan barakacayaal.”** Tani waxay soo jeedinaysaa in isku soo dhawaanshaha juqraafiga aysan qasab ahayn in loo turjumo xiriirka bulsheed ee ku xira kooxo kala duwan siyaabo macno leh oo joogto ah (ama loo yaqaan daboolista xiriirka bulshada). Qodobbada taageera ama caqabada ku ah abuuritaanka xidhiidhka bulshada ayaa noqon doona diiradda baadhitaan dheeraad ah ee wejiyada mashruuca ee soo socda.

**“Maya, waxaan dhihi lahaa dadka barakacay iyo dadka deegaanka ma ku biiraan koox isku mid ah. [...] Ma wadaagaan xaalad bulsho oo isku mid ah ” (Ka qayb gale dood kooxeedka habeysan oo lab ah)**

Xogo badan oo la xidhiidha xiriika bulshada ayaa ahaa kuwo naadir ah ama yar. Qaar ka mid ah barokacayaasha ragga ah waxay xuseen in taageerada iyo is garabgalka baro kacayaasha iyo bulshada martida loo yahay u qaadan karto qaab **"noocyo yar oo gargaar,"** sida macluumaadka helitaanka daryeel caafimaad. Xubnaha bulshada ee aan barakicin ayaa bixiyay tusaalooyin ah caawinta barakacayaasha u baahan iyaga oo siinaya cunto, dhar, ama agabka hurdada haddii ay baahi daran qabaan. Iyadoo la tixgelinayo qaabab habaysan oo xiriirka bulshada ah, qaar ka mid ah jawaab-bixiyeyaashii dadka deegaankooda lagu soo barakacay ayaa sheegay in barokacayaasha iyo dadka martida loo yahay ay ku biiraan kooxo bulshadeed isku mid ah, inkastoo dooduhu ay bixiyeen tusaalooyin aan sidaa u badnayn.

Waxaa intaa dheer, qaar kale ayaa shaki badan ka qabay sheegashadan, iyada oo mid ka mid ah kaqeybgalayaasha oo ka mid ah dadka aan barakicin uu ku soo gabagabeeyay: "**Maya, waxaan dhihi lahaa dadka barakacay iyo dadka deegaanka ma ku biiraan koox isku mid ah. Sababta ayaa ah barakacayaasha waa qaxooti, halka dadka deegaanka ay halkan ku noolaayeen muddo dheer. Ma wadaagaan xaalad bulsho oo isku mid ah [...] Sababta dadka barakacayaasha ah aysan ugu biiri karin ayaa ah in ay yihiin dad guryahoodii ka cararay oo xaalad adag ku jira."**

Dadaallada ay wadaan qaar ka mid ah ururada aan dawliga ahayn ee ah in si firfircoon loogu daro barokacayaasha iyo kooxaha la haybsooco ee ku jira qaab-dhismeed habaysan ayaa ah gelitaanka Xiriirka isku xirka bulshada iyo daboolista xiriirka bulshada, laakiin xog-bixiyeyaashii muhiimka ahaa waxay tilmaameen in mashruuca uu yahay waqti xaddidan dabeecadda ka qaybgalkooda uu u muuuqdo dhibaato. Intaa waxaa dheer, iyada oo aan la sii wadin hanuunin dibadeed ama isbeddel gudaha ah oo ku yimaadda caadooyinka bulshada, dhaqdhaqaaqyadii hore u jiray waxay u janjeeraan inay dib u soo celiyaan naftooda iyo barakacayaasha, oo ay weheliso haweenka iyo kooxaha kale ee la takooro ayaa laga saari karaa ururadan si fiican u qasdoobay iyo magac ahaan isku dhafan. Ka qaybgalayaasha marti-gelinta shirka ayaa sidoo kale tilmaamay in aysan ku qanacsanayn qaar ka mid ah hay'adaha aan dowliga ahayn oo meelaha qaar wax u siiya barokacayaasha, iyaga oo xusay cadaawadda ay tani ka dhaxayso bulshooyinka.

## Maxaa ka cusub natiijadan?

Daliilaha caalamiga ahi waxay tilmaamaam in wada noolaanshaha deegaaneed ee isku dhow ay abuurto fursado xidhiidho adag iyo is dhex galka bulsho ee ka dhexeeya bulshooyinka soo barakacay iyo kuwa martida loo yahay muddo dheer ka dib[9]. Daraasadani waxay muujinaysaa in isu dhawaanshaha deegaaneed oo keliya aysan si toos ah u tarjumin is-dhexgalka macnaha leh gaar ahaan gobolka Banaadir: xiriirka ka dhexeeya barokacayaasha iyo dadka martida loo yahay ayaa u muuqda mid ku dhisan macaamil ganacsi ah. Dadaalada hay'adaha aan dowliga iyo Barnaamijadooda ku saabsan daboolista xiriirka bulshada waa la wiiqi karaa iyada oo aan la helin xeelado lagu ilaaliyo guulaha la gaaray.

## Maxay tani muhiim u tahay adkeysiga?

IXidhiidhada liita iyo kuwa wax kala iibsigu waxa ay xaddidaan helitaanka fursadaha nololeed, ilo taageero oo waara, xalinta mashaakil wadareed, iyo ilaalin. Barnaamijyada diiradda saaraya adkeysiga ujeeddadeeduna tahay in laga faa'iidaysto xiriirka bulshada waa inay noqotaa mid si wanaagsan loo qaabeeyey oo lagu maalgeliyay isbeddelka dhaqdhaqaaqa xididaysan.

9. Deuchar, R. (2011) 'People Look at Us, The Way We Dress, and They Think We're Gangsters': Bonds, Bridges, Gangs and Refugees: A Qualitative Study of Inter-Cultural Social Capital in Glasgow,' *Journal of Refugee Studies*, 24(4), 672-689; Gurung, S. and Shean, A. (2017) *Social Capital and Good Governance: A Governance in Action Research Brief*. Mercy Corps; Feinstein and Poleacovschi (2023) 'Making Democracy Work in a Refugee Camp.'

## Natiiijada 4: Muddada dheer ee barakaca ee gobolka Banaadir si toos ah uma tarjumeyso xiriirka bulshada oo ka ballaaran ama ka xoog badan marka loo eego xiriirka dhow ee deriska ku saleysan.

Barakacayaal badan oo ku nool Banaadir ayaa sanado isku meel ku noolaa. Si kastaba ha ahaatee, xogta tayada iyo tirada labadaba waxay tilmaamaysaa in waqtiga oo keliya aanu u horseedin shabakado bulsho oo xoog badan (daboolista xiriirka bulshada) ama helitaan wanaagsan oo hay'adaha (Xiriirka isku xirka bulshada).

Tusaale ahaan, xogta sahanka ma muujinayso koror cad oo ka qaybqaadashada kooxaha abaabulan (sida iskaashatooyinka, ururada hab-nololeedka ama kooxaha haweenka) muddada barakaca. Ku dhawaad 30% dadkii dhawaan yimid ayaa ka warbixiya ka qaybqaadashada qoyska ee kooxaha abaabulan marka la barbar dhigo 15% kuwii barokacay 3-5 sano iyo 26% kuwa barokacay 5 sano ama ka badan. Dhab ahaantii, boqolkiiba jawaab bixiyaasha ka warbixiyey inay hayaan door hogaamineed dhab ahaantii waxay hoos u dhacaysaa muddada dheer ee dadku ay barakaceen, taasoo hoos ugu dhacday in ka yar 3% kuwa barokacay shan sano ama ka badan. Helitaanka hay'adaha ayaa sidoo kale hoos u dhacaya si la mid ah. Ku dhawaad saddex meelood meel barakacayaasha muddada dheer degganaa waxay soo sheegaan in aanay wax xidhiidh ah la lahayn dawladda. Taa beddelkeeda, jawaab-bixiyayaasha bulshooyinka barokacay iyo kuwa aan barakicinba waxay tilmaameen in dadka aan barakicin ay leeyihiin shabakado cufan, si wanaagsan u horumarsan oo dadka barokacay aanay qasab ahayn inay helaan, xitaa sannado badan ka dib.

Xogaha tayada leh waxay soo tilmaameen qaar ka mid ah sababaha keenay arrintan. Mid ka mid ah sharraxaadda ayaa ah in shabakadaha bulshadu ay si qoto dheer ay u ugu baahaan xaafada balse aysan u gudbin banaanka xaafada. Xiriirka isku xirka bulshada oo xaddidan, oo lagu faahfaahiyay qaybaha hore, waxay keenaysaa caqabadaha qaab dhismeedka helitaanka adeegga labadaba, iyo hagaajinta xaaladaha. Sida xubin ka mid ah bulshada martida loo yahay uu arkay, **"Waxaa jira xaalado ay ku adag tahay [Barakacayaasha] iyo meelaha laga saaray, sida xafiisyada dawladda, marka ay u baahdaan inay booqdaan xafiisyadaas, waa arrin adag. Haddii ay u baahan yihiin inay helaan adeegyada dawladda ee waxbarashada ama arrimaha caafimaadka, si gaar ah ayay ugu adag tahay dadka barokacay. Dadka deegaanka, waxay leeyihiin wakiillo ku sii jira deegaanka, halka dadku aysan haysan matalaad noocaas ah**. "

Qof kale oo aan barakicin ayaa caqabadan si toos ah ugu xiray u doodid wax ku ool ah, isagoo yiri "**Dadka barakacay dhibaato ayay la kulmaan marka ay dacwo u soo gudbiyaan, tusaale ahaan, haddii ay rabaan inay arrin u keenaan maamulka, waa caqabad, sababta ayaa ah ma jiraan shaqsiyaad ku hadlaya magaca dadka barakacayaasha ah, xafiisyada dowladda waxaa laga yaabaa inay u baahdaan cid matasha**".

Yaraanta soo food saartay barakacayaasha, waxa keentay in ay waayeen waqti ay ku dhistaan is-aaminaad oo ay horumariyaan doboolista xiriirka bulshada oo ballaadhan. Sida uu sheegay mid ka mid ah dadka barakacayaasha ah ee ku sugan Dayniile. "**Haddii aan ku jiro xaalad deggan, waxaan sameyn karaa saaxiibo, laakiin haddii aan ku noolahay nolol adag oo carruurtaydu ay gaajaysan yihiin, ma dhisi karo xiriir bulsho**."

**"Haddii aan ku jiro xaalad deggan, waxaan sameyn karaa saaxiibo, laakiin haddii aan ku noolahay nolol adag oo carruurtaydu ay gaajaysan yihiin, ma dhisi karo xiriir bulsho."**
**(Ka qayb gale dood kooxeedka habeysan oo lab ah)**

Iyadoo dib loo eegayo waxtarka kooxaha kaydka, kuwaas oo loo arko inay yihiin faragelin wax ku ool ah oo loogu talagalay adkeysiga bulshada, mid ka mid ah haweenka barakacayaasha ah ayaa soo warisay: "**Ma abuurno kooxo lacag aruuriya sababtoo ah lacag ma haysanno.**" Xog-hayaha muhiimka ah ee ururrada aan dawliga ahayn ayaa sharraxaad dheeraad ah ka bixiyay: **"Sidaas darteed kuwa kale ayaa ku caawin kara, laakiin haddii aad baahi u qabto oo aad hesho caawimo, waa inaad sidoo kale dib ugu soo celisaa miiska iyo beelaha laga tirada badan yahay waxay leeyihiin xiriiro yar si ay u keenaan faa'iidooyin labada dhinac ah si ay u horseedaan ka-saarid dheeraad ah."**

## Maxaa ka cusub helitaankan?

Daliilo badan oo caalami ah oo jira ayaa isku xira barakaca muddada dheer iyo faqriga joogtada ah iyo nuglaanshaha laakiin inta badan waxay u maleynayaan in isdhexgalka bulshadu uu soo hagaagayo waqti ka dib. Natiijooyinkayagu waxay u muuqdaan inay ka hor imanayaan malo-awaalkaas iyagoo muujinaya in Kaxda iyo Dayniile, waqtigu u muuqdo inuu sii qoto dheereynayo xiriirka degaanka laakiin uusan ballaarin gelitaanka kooxaha ama hay'adaha. Tan waxa laga yaabaa in ay sidaas awgeed la jaanqaado sii socoshada ama xitaa kordhinta go'doominta bulshada waqti ka dib[10].

## Maxay tani muhiim ugu tahay adkeysiga?

Marka muddada barakaca aysan u horseedin shabakado xoog badan ama helitaan hay'ado caawiya, qoysasku waxay ku sii jiri karaan xeelado la qabsiga muddada gaaban, halkii ay ka tiirsanaan lahaayeen soo kabasho macno leh iyo dhisidda adkeysiga. Tani waxay caawin kartaa sharraxaadda sababta barokacayaasha muddada dheer degganaa ay ula kulmaan shoog sida aadka u carqaladeeya, inkastoo sanado ay haysteen deegaan.

10. Internal Displacement Monitoring Centre (IDMC) (2020) *No Land, No Water, No Pasture: The Urbanisation of Drought Displacement in Somalia*; Atimniraye Nyelade, R., Zhang, D., Chika Chukwuorji, J., and Kator Iorfa, S. (2025) "It's Colder On the Outside": Lived Experiences of Internally Displaced Persons Staying Outside Displacement Camps. *Journal of Asian and African Studies*, 60(3), 1504-1510.

# Talooyin

**Natiijooyinka kor ku xusan waxaa laga soo qaatay weji tijaabo ah oo bilow ah oo ah mashruuc cilmi-baaris oo sanado badan leh iyo goobo badan ka socday. Tijaadani waxaa loo qorsheeyay in lagu eego ama tijaabiyo qalabka cilmi-baarista, sifeeyo su'aalaha, falanqaynta, iyo in uu aqoonsado qaababka muhiimka ah ee baaritaan dheeraad ah. Sido oo kale, natiijooyinka waa in loola dhaqmo si ku meel gaar ah, oo aan loo eegin sidii ay matali lahaayeen dhammaan dadka barakacayaasha ah ee ku nool Banaadir, ama Soomaaliya oo dhan. Wejiyada xiga ee cilmi-baadhistu waxay balaadhin doonaan xog-ururinta waxayna u ogolaan doonaan in si qoto-dheer loo falanqeeyo kala duwanaanshaha kooxaha iyo dariiqooyinka sababa ee xiriirka isku xirka bulshada iyo adkaysiga.**

**Hoos, waxaanu ku soo bandhigaynaa fikrado hordhac ah iyo saamaynta ay ku leedahay bulshada, xirfadlaha, siyaasada iyo daneeyayaasha cilmi-baarista ee ku salaysan fikradahan hore.**

## Saamaynta hordhaca ah ee deganeyaasha bulshada, qabanqaabiyeyaasha iyo masuuliyiinta rasmiga ah

Kaabayaasha bulshada ee Gobolka Banaadir waa dhab jirta, laakiin jilicsan oo aan si siman loo qaybsan. Barakacayaasha ugu badan ee ku nool Kaxda iyo Dayniile ayaa soo sheegaya inaysan cidna wax taageero ah ka helin xilli dhawaan ay dhibaato la tacaaleen. Halka taageerada ay ka jirto, waa mid ka timaada deriska, oo deg deg ah, oo gebi ahaanba ku kooban bulshooyinka gudaha ku barakacay laftooda. Taageerada la soo agaasimay sida bulshada iyo kooxaha haweenku waxay gaadhaan qaar ka mid ah qoysaska aadka u go'doonsan, laakiin caadooyinka is-dhaafsiga ayaa la kulma cadaadis xaaladaha faqriga daran halkaasoo xubnaha bulshadu aanay is taageeri karin. Xidhiidhka dawladda iyo hay'adaha ayaa sidoo kale xaddidan oo inta badan aan la heli karin dhexdhexaadiye la'aan, iyo muddada dheer ee barokaca, keligeed, looma turjumin shabakado ballaadhan. Adigoo ka shaqeynaya sidii loo ballaarin lahaa helitaanka, xoojinta kalsoonida, iyo dhisida isku xirnaanta waarta, dadka deegaanka, qabanqaabiyeyaasha iyo hogaamiyayaasha bulshada waxay gacan ka geysan karaan abuuritaanka nidaam taageero ballaaran oo waara.

### 01 Ka faa'iidaysa iskaashiga iyo isku-duubnida deriska si loo abuuro jawaabo wadajir ah oo si habaysan loo abaabulay, laguna wajaho dhibaatooyinka iyo qalalaasaha ay bulshadu wada saamayso.

Taageerada deris-ilaa-deris, sida wadaagista cuntada ama la socodka qof u baahan adeeg caafimaad, ayaa ah nidaamka ugu muhiimsan ee taageero ee ay barakacayaashu sheegeen, marar badan waa taageerada keliya ee ay helaan. Hogaamiyeyaasha iyo abaabulayaasha bulshada ayaa gacan ka geysan kara in hababkan taageero loo habeeyo si ay u noqdaan kuwo joogto ah oo la isku halayn karo. Tani waxay ku iman kartaa, tusaale ahaan, samaynta kooxo is-caawineed oo heer xaafadeed ah ama sanduuqyo deg deg ah oo ay bulshada wada maamusho.

### 02 Maalgeli dhisidda xiriirro waara, ee aan ku koobnayn is-dhaafsi adeeg ama macaamil ganacsi, si loo xoojiyo isku xirnaanta u dhexeysa barakacayaasha iyo bulshada martida loo yahay.

Xiriirrada ka dhexeeya dadka barakacay iyo kuwa aan barakacin ee ku nool Banaadir ayaa inta badan lagu tilmaamay kuwo shaqo-ku-saleysan ama dan gaar ah ku dhisan, sida helitaanka shaqooyin ku meel gaar ah ama is-weydaarsiga macluumaadka.

Inkastoo isdhexgalka noocan ahi faa'iido leeyahay, haddana ma abuuro kalsoonida iyo is-caawinta joogtada ah ee saldhigga u ah xiriika bulshada ee xooggan. Dhanka kale, xogta tayada leh waxay muujisay aragtiyo kala duwan oo ku saabsan in dadka barakacay iyo kuwa aan barakacin ay si siman uga qaybqaataan kooxaha iyo ururrada bulshada. Qaar ka mid ah ka qaybgalayaashu waxay sheegeen in sumcadda bulshada, heerka nololeed, iyo xaaladda barakaca ay mararka qaarkood abuuraan kala fogaansho iyo caqabado ku yimaadda isdhexgalka bulshada. Caadooyinkan iyo aragtiyahan bulsheed badanaa si tartiib ah ayay isu beddelaan haddii aan la samayn dadaallo si gaar ah loogu wajahan yahay. Hogaamiyeyaasha iyo abaabulayaasha bulshada ayaa door muhiim ah ka qaadan kara wax ka qabashada arrintan iyagoo xoogga saaraya abuurista ama ballaarinta qaabab iyo hay'ado ay si wadajir ah dan ugu qabaan dadka barakacay iyo bulshada martida loo yahay. Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara kooxo bulsho oo wadajir ah, iskaashatooyin nololeed oo isku dhafan, ama ururro kayd iyo amaah wadaag ah. Qaababkan ayaa abuura dano iyo mas'uuliyado ay labada dhinac wadaagaan, taas oo dhiirrigelinaysa in la ilaaliyo lana xoojiyo xiriirrada bulshada muddo dheer. Marka ay jiraan dano wadaag ah iyo faa'iidooyin ay labada dhinac ka helaan iskaashiga, xiriirradu waxay ka gudbi karaan heerka macaamilka ama dan-ku-saleysan oo keliya, waxayna isu beddeli karaan kuwo ku dhisan kalsooni, is-ixtiraam, iyo iskaashi waara.

## 03 Eabuur waddooyin ay dadka barakacay ku heli karaan adeegyada dowladda iyo hay'adaha kala duwan, kuwaas oo aan ku xirnayn xiriirro shaqsiyeed ama cid ay garanayaan.

Xogta sahanka iyo waraysiyada tayada leh ee laga ururiyey Banaadir waxay si joogto ah u muujinayaan in dadka barakacay ay leeyihiin helitaan xaddidan oo inta badan dad dhexdhexaadiyaal ah ugu xiran marka ay la macaamilayaan dowladda. Cabsi, aqoon la'aan ku saabsan nidaamyada jira, iyo caqabado qaab-dhismeed ayaa sii xoojiya ka reebnaanta ay la kulmaa. Guddiyada bulshada iyo kooxaha haweenka ayaa durba u shaqeeya sidii dhexdhexaadiyeyaal aan rasmi ahayn oo taageera qoysaska qaarkood, iyagoo ka caawiya xubnahooda helitaanka adeegyada ama gaarsiinta cabashooyinka iyo arrimaha ay qabaan maamulka deegaanka.

Hogaamiyeyaasha bulshada waxay xoojin karaan oo nidaamin karaan doorkan si uu u noqdo mid waxtar badan oo joogto ah. Tani waxay ku lug leedahay hubinta in hababkan taageero iyo xiriirrada lagu gaaro adeegyada ay noqdaan kuwo si cad loo yaqaan, sahlan in la isticmaalo, isla markaana si joogto ah ugu furnaada qoysaska aan lahayn xiriirro ama taageerooyin hore. Sidoo kale, waa muhiim in si ula kac ah loogu xiro nidaamyadan dadka dhowaan barakacay iyo kuwa bulshada dhexdeeda go'doonsan, si loo hubiyo in dhammaan dadka barakacay ay helaan fursad siman oo ay ku gaaraan adeegyada, macluumaadka, iyo hay'adaha ay u baahan yihiin. Tani waxay ka qayb qaadanaysaa yaraynta ka reebnaanta bulshada iyo kor u qaadidda ka-qaybgalka dadka barakacay ee arrimaha bulshada iyo maamulka deegaanka.

## Saamaynta hordhaca ah ee ku wajahan hay'adaha horumarinta iyo gargaarka bani'aadannimo

Xiriirrada bulsho ee ka dhex jira bulshada – gaar ahaan kuwa ka dhexeeya deriska – ayaa durba ah il muhiim ah oo taageero u ah dadka barakacay, inkastoo taageeradaasi ay xaddidan tahay. Si kastaba ha ahaatee, taageeradani badanaa waa mid ku meel gaar ah, baaxad yar leh, isla markaana aan si siman ugu qaybsanayn dhammaan dadka u baahan.

Dadka ku jira barakac muddo dheer socday ayaa inta badan la kulma caqabado ku saabsan ballaarinta iyo xoojinta shabakadaha ay bulshada ku leeyihiin, xitaa marka ay muddo dheer ku noolaayeen meel u dhow bulshada martida loo yahay.

Taas macnaheedu waa in joogitaanka muddo dheer keliya uusan mar walba horseedin xiriirro bulsho oo xooggan ama isdhexgal qoto dheer. Barnaamijyada horumarinta iyo gargaarka bani'aadannimo waxay leeyihiin awood ay ku taageeraan oo ku xoojiyaan xiriirradaas bulsho. Waxay sidoo kale abuuri karaan ama ballaarin karaan fursadaha ay dadka barakacay ku gaari karaan hay'adaha iyo geeddi-socodyada go'aan qaadashada. Habkan ayaa kordhin kara saamaynta wanaagsan ee barnaamijyada, isla markaana ka caawin kara in la yareeyo ama laga hortago waxyeellada iyo cawaaqibta aan loo baahnayn ee ka dhalan karta faragelinnada la sameeyo.

## 01 Nakhshad barnaamijyo ku saabsan ka-qaybgal macno leh iyo muujin cad oo saamayn ku leh maalgelinta si loo ilaaliyo faa'iidooyinkan.

Natiijooyinkayagu waxay soo jeedinayaan in iyada oo barokacayaashu ay inta badan si aan rasmi ahayn uga qaybqaataan goobaha bulshada, ay naadir ku yihiin kooxaha abaabulan oo ay sheegaan inay dareemayaan inay saameyn kooban ku leeyihiin go'aamada iyaga saameeya. Xisaabaadka tayada leh waxay soo jeedinayaan haweenka, gaar ahaan, inay inta badan wax ku biiriyaan nolosha bulshada laakiin waxay dareemaan in codkooda la leexiyay ama aan la maqlin. Jilayaasha bini'aadantinimadu waa in ay mudnaan siiyaan habab ka qaybqaadasho cad oo si toos ah ugu xidhan in la doorto, qodobbada go'aannada gaarka ah ee marxaladaha muhiimka ah ee meertada barnaamijka. Ka qaybgalka bulshada waa in la xisaabiyaa si loo ogaado in haweenka iyo qoysaska aadka loo haybsooco - sida kuwa caafimaad darro, naafada ah, ama saboolnimada aadka u daran - ay leeyihiin wadooyin la heli karo oo saameyn ku yeelan karo, ma aha kaliya imaanshaha. Marka fikradda la codsado jawaab celinta waa in si firfircoon loogu bixiyaa bulshooyinka fariimaha sida aad sheegtay, waanu samaynay. Qiimaynta fudud ee hoc-ga dambe ee dadaalkan oo kale waa in si cad loo diiwaangeliyo: haddii aanaan helin talooyinkan, sidee barnaamijku u ekaan lahaa mid ka duwan? Gudaha, ururadu waa in ay dib u eegaan oo marka loo baahdo wanaajiya cabbirka iyo la socodka saamaynta iyo codka joogitaanka. Habkani waxa uu la socdaa, laakiin waxa uu ka dhigayaa mid la taaban karo, ballanqaadyada la xisaabtanka dadka ay saamaysay iyo ka-qaybgal macno leh. Barnaamijyada wadaaga ku salaysan ama kuwa wadajirka ah ee lala yeesho shuraakada badan waa in mudnaanta la siiyaa dadaallada lagu horumarinayo ka-qaybgalka macnaha leh, si loo taageero gaaritaanka ballaaran iyo guulo waara, maadaama ay ifafaale ku habboonayn hal jilaa ama hab aamusan.

## 02 La shaqaynta nidaamyada taageerada heerka deris sida aasaaska adkeysiga taasoo kulmisa dhammaan dadka barakacau iyo bulshooyinka martida loo yahay.

Natiijooyinkayadu waxay muujinayaan in barokacayaal badan ay soo sheegaan inaysan helin wax taageero ah haba yaraatee, laakiin kuwa helay, deriska ayaa ah meelaha ugu joogtada ah ee taageeradaas. Bulsho badan oo ay saamaysay barokacayaasha iyo dadka martida loo yahay waxay isku arkaan meel u dhow. Barnaamijyada bini'aadantinimo waa in ay u qaabeeyaan caawimada habab kaabaya oo xoojinaya taageerada deriska ku salaysan, halkii ay ka qaadan lahaayeen in kooxaha ama machadyada rasmiga ahi ay yihiin meesha ugu horraysa ee laga soo galo. Naqshadayntu waa in ay tixgelisaa bulshada la beegsanayo ee ka baxsan barokacayaasha oo ay ku jiraan dadka martida loo yahay ee nugul si looga fogaado abuurista kala qaybsanaan iyo in la helo gelitaanka daboolista xiriirka bulshada. Dadaallada sidoo kale waa in ay ku jiraan isku dhafka tallaabooyinka qiimeynta haddii qoysasku helaan ama ay taageero siiyaan deriska.

Halka shabakadaha xiriirka bulshadu ay ku firfircoon yihiin gargaarka wadajirka ah iyo is-dhaafsiga, kaabista xaafaddu diiradda saarayso bartilmaameedka qoyska – sida hantida la wadaago ee yar yar ama xawilaadda lacagta caddaanka ah ee la wadaago – waxay taageeri kartaa oo xoojin kartaa nidaamyada la qabsiga, halkii ay beddeli lahaayeen. Halka taageerada deriska ka maqan tahay, waxqabadyada taageerada xiriirka bulshada ee habaysan oo ay ku jiraan dadaallo hab-nololeed heer kooxeed ah ama iskaashatooyin ayaa aasaas u noqon kara is-dhaafsiga iyo is-caawinta. Habka noocaan oo kale ah wuxuu la jaan qaadayaa ballanqaadyada ku saleysan bulshada iyo barnaamijyada dadka, tusaale ahaan Baahiyaha Bani'aadantinimada iyo Qorshaha Jawaab celinta ee Soomaaliya 2025.

## 03 Iska ilaali in aad u maleyso in barakacayaasha muddada dheer deggenaa ay yihiin kuwo bulsho ahaan ama hay'ad ahaanba isku dhafan.

Natiijooyinkayagu waxay soo jeedinayaan in muddada dheer ee barakaca aysan si toos ah u horseedin shabakado bulsho oo xoog badan, cod weyn, ama marin wanaagsan oo lala yeesho maamulada iyo hay'adaha dibadda. Inkastoo qaab-dhismeedka jira iyo ballan-qaadyada rasmiga ah ay inta badan xoogga saaraan kala-guurka barakaca oo ku saleysan marxaladda oo aan si gaar ah waqti ku xirneyn, dib u eegisyadii dhawaa waxay muujinayaan in barokaca dhow inta badan la siiyo mudnaan gaar ah marka loo eego wax ka qabashada bini'aadantinimada, iyo nidaamyada ayaa ah kuwo si liidata loo meeleeyay si loo bixiyo mudnaanta kuwa ku jira barakaca daba dheeraaday.

Natiijooyinkayagu waxay bixiyaan caddayn dheeraad ah oo ku saabsan caqabadaha joogtada ah ee barakaca daba dheeraaday, waxaanu samaynaa kiis adag oo ku saabsan la socodka iyo bartilmaameedka si loo tixgeliyo ka mid noqoshada bulshada, isdhexgalka sharciga ah ee xuquuqda lahaanshaha iyo kaararka aqoonsiga oo ay la socdaan tilmaamayaasha helitaanka ee cabbirka muddada barakaca. Tani waxay la jaanqaadaysaa aqoonsiga sii kordhaya ee barakaca daba dheeraaday[11] inay tahay xaalad u baahan ka-qaybgal bini'aadantinimo oo joogto ah.

## Saamaynta hordhaca ah ee ku wajahan maalgeliyeyaasha gargaarka bani'aadannimo

Gobolka Banaadir, kaabayaasha bulshada ee barokacayaashu ay ku tiirsan yihiin – xaddidan, aan rasmi ahayn, deris ku salaysan, oo ku shaqeeya miisaan ka yar marka loo eego inta badan barnaamijyada loo qorsheeyay in la gaaro – si fiican uma qabsan qaab-dhismeedyada maalgelinta caadiga ah. Qaababkan iyo shuruudahan ayaa qaabeeya nooca taageerada la helo, waxa lagu tiriyo ka-qaybgal macno leh, iyo dadka loo arko inay diyaar u yihiin inay ka gudbaan barnaamijyada bani'aadamnimada. Sidaa darteed maal-galiyayaasha ayaa door muhiim ah ku leh hubinta in qaab-dhismeedyadani ay ka tarjumayaan xaqiiqada barakaca: aqoonsashada awoodda xiriirka iyo bulshada inay yihiin wax-soo-saarka barnaamijka oo sharci ah iyo ka fogaanshaha malo-awaalka ku saabsan is-dhexgalka oo laga yaabo inaan lagu dhaqmin.

## 01 Maalgeli awoodda bulshada iyo xiriirka, ma aha oo kaliya adeegyada iyo kaabayaasha.

Natiijooyinkayadu waxay muujinayaan in barokacayaasha ku nool Banaadir ay inta badan sheegaan in aysan helin wax taageero ah haba yaraatee xilliyada shoogga, yo waxa ay helaan ay si weyn ugu xiran tahay taageerada bulsho ee aan rasmiga ahayn, halka xiriirka rasmiga ah ee hay'adaha uu yahay mid liita.

11. Sida et al (2024) *Independent Review of the IASC Response to Internal Displacement*, ODI Global; Miller, S. (2024) *A Global View on Responses to Internal Displacement: Where to Go From Here?* Refugees International.

Maalgeliyayaasha bini'aadantinimada waa in ay sidaas darteed tixgeliyaan maalgelinta si ay u taageeraan fududaynta, kalsoonida-dhisidda, iyo isku-dubbaridka degaanka oo ay weheliso bixinta adeegga. Tan waxaa ka mid ah in loo aqoonsado hababka taageerada heerka xaafadeed iyo bulshada ku saleysan inay yihiin hanti dhismo dib-u-celin sharci ah, iyadoo lagu taageerayo kuwan inay noqdaan kuwo loo dhan yahay. Habkani wuxuu la jaan qaadayaa ballanqaadyada deeq-bixiyayaasha ee ku aaddan deegaan-dejinta iyo gargaarka dadka-ku-saleysan.[12]

## 02 Taageerida maalgashiga, iyo la socodka, dadaallada lagu hubinayo ka qaybqaadashada macne leh inay u tarjumaan saamaynta go'aamada.

Natiijooyinkayagu waxay tilmaamayaan xaqiiqda ah in ka qaybqaadashada iyada oo aan saameyn lahayn aysan xoojineynin xiriirka bulshada oo xitaa laga yaabo inay wiiqdo kalsoonida. Deeq-bixiyeyaashu waa inay sidaas darteed u fududeeyaan oo ay dhiirigeliyaan la-hawlgalayaasha si ay u muujiyaan sida talooyinka bulshadu u saameeyaan go'aamada barnaamijka iyada oo loo marayo ka mid ahaansho macno leh oo tayo leh, halkii ay diiradda saari lahaayeen jiritaanka ama tirada hababka wadatashiga. Qaab-dhismeedka maalgelinta ayaa tan ku taageeri kara iyada oo la kala horraysiiyo meertada jawaab-celinta iyo barnaamijyada la-qabsiga, oo waafaqsan ballan-qaadyada deeq-bixiyayaasha ee la xisaabtanka iyo maamulka loo dhan yahay

## 03 Ha u isticmaalin muddada barakaca wakiil ahaan u diyaargarowga kala-guurka.[13]

Cilmi-baadhisteenu waxay soo jeedinaysaa in dadka barakacayaasha ah ee muddada dheer deggenaa ee Banaadir laga yaabo in ay aad uga go'aan yihiin hay'adaha xataa kuwa cusub. Maalgeliyayaashu waa inay ka fogaadaan inay u maleeyaan in muddada barakaca ay si toos ah u tarjumeyso isdhexgalka, adkeysiga ama hoos u dhaca baahida bini'aadantinimo. Taa baddalkeeda, go'aamada maalgelinta waa in lagu wargeliyaa caddaynta ka mid noqoshada bulshada, codka, iyo gelitaanka, kuwaas oo waqti ku kala duwanaan kara siyaabo kala duwan. Tani waxay la jaan qaadaysaa aqoonsiga deeq bixiyayaasha in xalalka waara ay ku salaysan yihiin shuruudo halkii ay ku salaysnaan lahaayeen watiga[14].

## Tallaabooyinka xiga

Iyada oo la kaashanayo fikradaha laga helayo marxaladda tijaabada ah, bilaha soo socda, kooxda mashruuca SoCap ayaa dib u habeyn ku sameyn doonta, dib u naqshadeyn iyo dib u habeyn ku sameyn doona agabka xog aruurinta ee dib loo eegay ee Dayniile iyo Kaxda, iyada oo ujeedadu tahay inaan sii qoto dheereyno fahamkayaga sida xiriirka bulshada u kala duwan yahay gudaha iyo kooxaha muhiimka ah.

12. EU/DG ECHO (2023) *Guidance Note: Promoting Equitable Partnerships with Local Responders in Humanitarian Setting Guidance on Equitable Partnerships*; Government of Ireland (2024) *Irish Aid Annual Report 2023*.
13. Government of Canada (2024) *Report to Parliament on the Government of Canada's International Assistance 2023-2024*.
14. EU/DG ECHO (2022) *Addressing Displacement and Migration Related to Disasters, Climate Change and Environmental Degradation*; Government of Ireland (2019) *A Better World: Ireland's Policy for International Development*.

# Xog ku saabsan Mashruuca SoCap Project

Mashruuca Doorka Xiriirka Bulshada ee Arimaha Burburka iyo Dagaalka Magaalladu dhaliyeen (SoCap) waa mashruuc cilmi baaris sadex sano socday oo ay maal gelisay Irish Aid laguna fuliyay iskaashi lala sameeyay Concern Worldwide. Wuxuu si nidaami ah u qiimeynayaa isdhexgallada u dhexeeya xiriirka bulshada, adkaysiga, bii'ada magaallada, iyo dagaalka iyo khalkhalka ka jira bulshooyinka magaallada ee la faquuqo ee wadamada Haiti, Somalia iyo Somaliland.

Cilmi baaristaan qaababka isku dhafan leh waxay diirada saaraysaa fahanka sida tubaha dhaliya xiriirada bulshada oo noqda adkaysi u dhexeeya kooxaha magaallada ee la faquuqo labadaba loo ilaaliyo loona adkeeyo, si loo aqoonsado qodobada farsamo ee muhiimka u ah fuliyaasha shaqada iyo xeerka.

Kooxda cilmi baarista waxaa ku jira Jessica Hsu iyo Robillard Louino, Gwoup Konbit, Haiti; Manar Zaki and Brenton Peterson, Consilient, Somalia iyo Somaliland; Dr Kelsey Gleason, University of Vermont; Dr Ronak Patel, Nova Frontlines; iyo Dr Caitriona Dowd, Jothsaïna Pierre iyo Abdulkadir Adan, University College Dublin.

Fikradaha, ra'yiyada iyo faalooyinka halkaan ku jira gebi ahaanba waa masuuliyada qoraayaasheeda mana matalayaan xeerka Irish Aid.

**Sida loosoo xigto meelaha laga soo qaatay daabacaadaan:**
Dowd, Caitriona, Jothsaïna Pierre, Abdulkadir Adan, Kelsey Gleason and Ronak Patel. (2026). *What are the sources of social capital? A pilot study in Banadir, Somalia.* SoCap Research Brief No. 3.

**Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca SoCap, fadlan**
**https://www.concern.net/knowledge-hub/social-capital-and-resilience-fragile-and-conflict-affected-urban-contexts**

SO CAP

CONCERN worldwide

Irish Aid
An Roinn Gnóthaí Eachtracha agus Trádála
Department of Foreign Affairs and Trade